



Qoraalka Ololaha Dembiyada Nacaybka

(Garda)

Dembiyada Nacaybku waxay ku yimaadaan noocyo badan, waxay keentaa cabsi, waxay kala qaybisaa bulshada waxayna yeelan kartaa saameyn muddo dheer ba'an. Garda Síochána wuxuu aqoonsan yahay saameynta Dembiyada naceybka ay u leedahay shakhsiyaadka, qoysaska iyo bulshada. Waxaan qireynaa inay jiraan warbixino yar oo kusaabsan Dembiyada Nacaybka waana wax aan rabno inaan badalno.

(Wakiilada Bulshada)

Haddii aad la kulantay ama goob joog ka ahayd Dambi Nacayb fadlan ku soo wargeli An Garda Síochána. Waxaad ku sameyn kartaa tan adigoo la xiriiraya ama booqanaya rugta Garda ee deegaankaaga ama adoo adeegsanaya xarunta cusub ee Ka Warbixinta Dembiyada Nacaybka Online-ka ah www.garda.ie

Dembiga nacaybku waa dhibaato bulsho oo u baahan jawaab-bulsho oo dhan ah. Haddii dhibbanayaasha, markhaatiyada iyo Gardaí ay wada shaqeeyaan, waxaan u diri karnaa fariin cad oo ah in Dembiyada Nacaybka aan la aqbali karin oo aan boos ku lahayn beesheena.

Si wada jir ah ayaan u jabin karnaa aamusnaanta Dembiyada Nacaybka, wax ka qaban karnaa kuwa mas'uulka ka ah waxaanna gacan ka geysaneynaa sidii dadka loo ilaalin lahaa ammaan.

Sinnaanta waa xuquuq aasaasi ah - in la xaqiijiyo sharafta iyo ixtiraamka dhammaan. Dembiyada Nacaybku waxay caqabad ku yihiin sinnaanta adoo weeraraya aqoonsigeenna iyo kala qaybinta bulshada.

Dhibbanayaasha Dembiyada Nacaybka badanaa waxay la il daran yihiin cabsi, dambi ama naxdin maxaa yeelay waxaa si fudud loogu bartilmaameedsaday cidda ay yihiin darteed.

Saamaynta Dembiyada Nacaybka ayaa ka baxsan shakhsiyaadka iyo qoysaska. Bulshooyinka oo dhamai waxay aqoonsanyihiin Dembiyada Nacaybka inay khatar ku yihiin shakhsiyaadka iyo dareenka wadajirka ah ee badbaadada.

Dadka qaarkiis ee ka warbixinaya Dembiyada Nacaybka waa ku adag tahay. Garda Síochána waxey dooneysa iney fududeeso taas adoo adeegsanaya warbixinta qadka ama lahadlaya Sarkaalka Kaladuwanaanta Garda.

Markaad warbixin u gudbisno Gardai waxaad siineysaa macluumaadka ay u baahan yihiin si ay u fahmaan wixii dhacay iyo inay uga jawaabaan si ku habboon. Adigu qasab maahan inaad sameyso warqad qoraal ah ama aad aadid maxkamadda haddii aadan rabin inaad sidaas sameyso.

Soo sheegida Dembiyada Nacaybka waxay ka dhigaysaa dadka inay la xisaabtamaan sharciga waxayna ka caawisaa ka hortagga dhacdooyinka mustaqbalka.

Garda Síochána ayaa diyaar u ah iney caawiso qof kasta oo ay saameysay naceybka ama cadaawada dadka kale, ha ahaato Dembi Nacayb ama Dhacdo Nacayb ah.

An Garda Síochána



Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan booqashada Dembiyada Nacaybka soo booqo www.garda.ie ama la xiriir Qeybta Kala-duwanaanta iyo Is-dhexgalka Qaranka ee Garda at diversity@garda.ie

Soo sheegida Dembiyada Nacaybka waxay ka caawisaa sidii looga dhigi lahaa mid muuqda. (Dhammaan) Aan wada joojino nacaybka.